



Marwo Cheryl Watson-Harris, Kormeeraha guud

Marwo Vickie B. Turner, Guddoonka Guddiga
Mudane Dijon DaCosta, Guddoomiye Ku xigeenka
Marwo Anna Hill
Mudane Marshall D. Orson
Marwo Deirdre Pierce
Marwo Allyson Gevertz
Dhaqtar Joyce Morley

Qoyska Qaaliga ah ee Dugsiga Gobolka DeKalb,

Waan ku faraxsannahay inaan dib ugu soo dhaweeyo aqoonyahanadeena guryaha dugsigeena bari subax oo waxbarashada waji ku wajiga ah hal sanno oo lakala maqnaa kadib. Waan ku faraxsannahay sannad dugiyeedkaan, oo aan ku faraxsannahay labadaba aqoonyahanadeena dib u soo galayo dugsiga, sidoo kale sida kuwa ku harayo goobta fogaanta. Iyada oo aan laga eegin caqabadaha COVID-19, shaqaalaheyga iyo aniga way naga go'antahay inaan siino waaya aragnimada waxbarasho guul ah oo tayo sareyso ardaydeena iyo qoysaskooda.

Iyada oo waxbarashada ay hormartay iyo barashada dib loo badelay, waan sii wadeynaa inaan ka dhigno badqabka mudnaanteena ugu horeyso. Markale, waa muhiim in ardaydeena raacaan xeeladaha yareynta ee ay tilmaameen Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC) si loo hubiyo in bulshada dugsigeena ay badqab tahay. Fadlan ka aqri halkaan sida aan [Ugu hayno DCSD Badqab](#) ee ka fogaanshaha jir ahaanta iyo gacmo dhaqashada. Warbixintaan waxaa sidoo kale laga heli karaa [Boggeena Dib u furida](#), oo ay la jiraan illaha iyo fasiraadaha kale. Waad ku mahadsantahay ku dhiirogelintaada ardaydeena inay raacaan maamuusyada badqabka la xiriirto COVID-19 sida xirashada maaskarooyinka, taas oo qasab ka ah dugsiyada, iyo ku haynta carruurtaada guriga markii aysan wanaagsan dareemeynin.

Sameynta xiriir xoogan ee u dhaxeeyo qoysaskeena iyo ardayda waxay hubisaa waxqabadka ardayga iyo kobaca waxbarashada. Qaar ka mid ah ardaydeena waxay la kulmeen qasaaraha waxbarashada inta lagu jiray cudurka safmarka oo DCSD waxaa ka go'an sheegida meelaha banaan ee guusha ee u ogolaaneyso dhammaan ardaydeena inay u hormaraan waxbarasho ahaan iyo bulsho ahaan. Fadlan ku xiran dugsiga canugaaga oo taageerada la xiriirto caqabado walba, oo waxbarashada ama dareenka, canugaaga laga yaabo inuu la kulmo inta lagu jiro cudurka safmarka.

Aad ayaan ugu faraxsannahay qoysaska ku sameeyo isbadel nololaha carruurtooda iyo bulshada dugsigeena ee mid walba iyo maalin walba. Si wada jir ah, ayaan ugu kalsoonnahay inaan sii wadeyno inaan u korno sida degmo iyo ardaydeena way duulayaan.

Salaamo gaar ah,

Marwo Cheryl Watson-Harris